

# Kala-wareega qorshaha iyo saacadahaaga adeega guriga laguugu dhex qabto



Sannad kasta, waxaad yeelataa kulan ama dhowr kulan oo lagu diyaarinayo Qorshahaaga Taageerada Shaqsiga (ISP). ISP-ga wuxu guud ahaan ku saabsan yahay waxa aad rabto inay nolashaadu u eekaato. Tan waxa ka mid ah yoolal, riyoyin iyo taageerada aad u baahan tahay si aad u gaarto waxyaabahaas.

Waxa laga yaabaa inaad haysato qof shaqaale ah oo kaa caawiya hawlaha maalinlaha ah tiro saacado ah oo go'an todobaadkii ama bishiiba. Taageerada kale ee aad heli karto waxa laga yaabaa inay ku jiraan mid aad ka hesho qoyska, asxaabta iyo ilaha kale ee bulshadaada.

Sannadkan horraantiisa, waxa aanu dirnay waraaqo ku saabsan saacadaha taageerada hawlaha guriga ee bilaabmi doona 2024.

Qofna saacadaha hawlaha gurigaaga lagaaga caawiyo lagama dhimayo 2024-ta.

Haddii saacadahaaga hadda ama taageerada kale ee aad hesho aanay daboolayn baahiyahaaga, ikhtiyaaro ayaad haystaa! La hadal maamulaha kiiskaaga.

Ka soo qaybqal kulankaaga ISP adigoo wada fikrado ku saabsan waxa aad rabto ee ay nolashaadu u baahan tahay. Soo sheeg oo wadaag doorbidyadaada. Soo martiqaad cid kasta oo aad rabto! Kulanku adiga ayuu kugu saabsan yahay.

Isbeddeladani waxay u dhacayaan si tartiibtartiib ah si aad u hesho waqti aad ku qorsheysato oo aad ku hubiso inaad hesho taageerada aad u baahan tahay si aad ugu noolaato noloshu aad rabto.

## Taageerooyinka ku jira qorshahaaga waxa ka mid ah:



- Taageero lacag laga baxsho
- Tiknoolajiyad
- Qoys



- Qoys
- Asxaab
- Khayraadyada ama ilaha laga heli karo bulshadaada



- Lagu kaabay taageero lacag laga baxsho
- Saacadaha lala joogo qofka shaqaalaha ah
- Adeegyada naafonimada korriin (DD) ee kale

## Khayraad loogu talagalay adiga iyo qoyskaaga

[Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo saacadaha lagu kaalmeeyo hawlaha guriga](#)

[Muuqaal sharraxaya isbeddeladan](#)

[Muddada saacadaha guriga dhexdiisa](#)

"Baahiyahaaga waa in had iyo jeer la daboolo. Haddii qorshahaagu aanu kugu habboonayn, la hadal maamulaha kiiskaaga. Tan waxaad sameyn kartaa waqti kasta!"  
- Hoggaanka ODDS



**The Compass Project**  
YOUR CHOICE. YOUR PATH. YOUR FUTURE.

